**JIDKEE LOO MARAA ILAAH?**

**Wax Isweyddinta Ma Xuma!**

***" Anigu Waxaan ahay Jidka iyo Nolosha." Yooxanaa 14:6***

Nolosha waxay noqon kartaa mid jahwareersan. Go'aan baad ka gaari kartaa oo mararka qaar adoo khibrad ka haysan inaad waxyaalo samaysid. Socdaal dheerna ma gali kartid adigoon garanayn kobtaad u socotid iyo sidaad ku gaari karto meeshaa.

Waa inaad heshaa khariiradda ku tilamaanta. Waa inaad weyddiisaa tilmaanta ama tusmada goobta ay kaa jirto meeshaad tiigsanaysid inaad gaarto. Waxaa kugu waajib ah inaad ogaato waddada aad marayso xaalkeeda. haddaba waa inaad furtaa oo aad akhrisaa buuggan yar si aad u garato waddada loogu tagi karo Ilaaha ku abuurtay.

Laakiinse su'aashu waxay tahay waa jidkee jidka Ilaah runta ah loogu tagi karaa?

Akhbaar la'aan. Xog la'aan, iyo ka warqabid la'aan baahsan, talo wareersan ee inagu abuuri karta iskuhdac garasha la'aaneyd, waxay kuu horseedi kartaa inay kaa lumiso doorka xaqiiqda ah ee loogu tagi karo ILaaha nool.

DIIMO FARA BADAN.

Inta badan diimaha waxay ku andacoodaan inay u horseedi karaan dadka tilmaanta tubta toosan ee Ilaah. Haddaba waxaa inagu waajib ah inaan ka fiirsano marka aan doondoonayno waxa uu yahay Ilaah waxyaalaha ku saabsan in laga fiirsado u baahan ee

ku saabsan baahida nolosha iyo qorshaheeda. Waxaa jira diimo farabadan iyo waxbaridyo badan oo ku saabsan Ilaah taas oo ah mid aan la sahlan Karin fahmideeda sida dhabta ah. Waxyaalaha qaar baa loo arkaa inay sahlan yihiin. ‘waxay yidhaahdaan dadka qaar inay

la mid tahay adiga oo alaabaha aad u baahan tahay ka dhex xulan kara suuqa Tukaamda supermar ketka (Tukaanada wadarta/jumladda ) waxaad doontid inaad ka dooran kartid. Waxay yidhaahdaan dadka qaar sida ina Axmed Diirye, Aweys Cali wiilka la magac baxay fikradahooda ku saabsan Ilaah sida loogu tagi karo waxay yidhaahdaan ka qaado hadba shayga ku anfaco oo ay dantaada ku jirto! Wixii intaa ka dambaysa, waxay yihiin giddi ahaan waa wax isku mid ah micno Ilaah waddada loogu tagi karo, side bay ikugu mid ugu noqon kartaa?

Anigu waxaan ka helaa Ciise Masiixa, adigana waxaad ka heshaa Allah, qof kale na wuxuu la dhcsan yahay Budha’ismka – sida dhabta ah micnu sidaa u weyn ma samayn karto. Laakinse dhamaantood ma wada sax baa?

Diimaha oo idil miyey kugu hogaamiyaan Ilaah?

Dadka intiisa badan waxay ku fikiraan inay sidaa tahay,

Laakiinse taa waxay la micne tahay inay waxbarridda diimaha idilkood ay is burinayaan mid walbaba midda kale ma wada runbaa. Middan waa caddayn inagu filan inaysan sax wada ahayn! Mana aha wax aan aqbali karno waxyaalan ku saabsan qaar ka mid eek u saabsan noloshayada gaarka ah, haddaba sideen ku aqbalnaa middan meeshaay ka timid su’aasha ku saabsan Ilaah.

Haddaba kee baa sax ah? Bal aan isweyddiino afartan qodob ee su’aalahan ay aas aaska u yihiin:

**Wa'ayo Ilaah?**

**Waa maxay Aadanuhu?**

**Waa maxay Dambigu?**

**Wa'ayo Ciise Masiixa?**

Su'aalahan ma mudna in la dhigo arrimmo laga wada dooda ama loo sii fiirsado. Waa wax aad loogu baahan yahay in la fahmo guud ahaan waxa ay tahay nolosha ama ay ku saabsan tahay sideedaba. Waxaad ka heli kartaa jawaabahooda haddii aad sii waddid akhrinta buugan yar aniga oo kaga jawaabaya su'aalaha aan isweyddiiyey ee dusha ku xusan sida ku xusan Ereyga Nool ee ku jitra fariinta wanaagsan ee ku jirta Ciise Masiixa.

**WAA KUMA ILAAH? MA CID GARANAYSA AYAA JIRTA?**

Sida runta su'aal weyn oo dadku isweyddiiyaan dadku weeye middan,

waxayna ku xiran tahay hadba jawaabteeda!

Sarreynta jiritaanka Qaadir Sareeye ah oo sida runta ah aan la garan ka uu yahay u ahaantiisa

oo u muuqan karta ruamaysad ay farxaf wejeliso oo aan la qiyaasi Karin

waaya aragnimada ay leedahay.

Xaggeed ka heli kartaa jawaabteeda?

Qaar ka mid ah dadka waxay yidhaahdaan jawaab looma hayo su'aashaas,

sababa oo ah wax Ilaah la yidhaahdo

Ma jiro. Qaar kalana waxay yidhaahdaan laga yaabaa inuu Ilaah jiro, laakiinse suurtagal inooma ah inaan garanno Isaga, sidaas daraadeed mar kale su'aashaas jawaab weli waa loo la' yahay ama lagama jawaabin.

Laakiinse dadka intiisa badan waxay aaminsan yihiin inuu Ilaah jiro, sareeyo ka sareeyo wax walba.

Dhibaatada kale ee jirtana waxay tahay inkasta oo a dadku aqbalsan yihiin jiritanka Ilaah, Laakiinse waxba kama garanayaan waxyaabaha Ilaah ku saabsan. Hadaba waa kuma? Side buu u eg yahay? sideen ku garan karnaa? Jawaabaha ay dadka ka bixininayaan ayaa ayaa ah waxyaalo iyaga qudhooda khuseeya oo ka turjumaya garaadkooda ku saabsan Ilaah tilmaantiisa.

Mid la waydiiyey sida ay la tahay tilmaanta Ilaah wuxuu ku jawaabay isaga oo leh waa oday weyn oo gadh weyn leh oo daruuraha samada dhexdooda fadhiya. Fikradda codkan waxay ka turjumaysaa dad badan inay sidaa la qabaan.

**Ilaaha Muxuu Ka Yidhi Waxyaaalaha Isaga Ku Saabsan.**

Faa'ido kuma jirto inaad kuwa kale aad weyddiiso jawabta su'aalahan oo kale.

Waxay u eg yihiin qudhooda dad wareersan. Waxaana kugu waajib ah inaad eegto

waxa uu Isaga isku sheegay Qudhiisa. Xageed ka helaysaa xogtaasi.

Jawaabtu waxay ku dhex jirtaa **Kitaabka Qudduuska**. Meeshaasna, waa meesha aan ka helayno

jawaabaaha oo idil ciddii sida dhabta ah u doonayso inay wax ka ogaato faahfaahinta

arrimaha khuseeya Ilaah. Ilaah baana jawaabaha oo idil inta sida

Laga yaabe inay kuwaasi aysan ahayn jawaabbihii ay filayeen laakiinse

waa jawaabtii Ilaah qudhiisa na siiyey, sabataas o ah sababtii

**Kitaabka Qudduuska** ee aannu ugu naqaanno “**Ereyga Ilaah**”,

Waxaannu ka heleynaa ammaanta Ilaah iyo muunada Ilaah ee yaabka badan.

May aysan jirin waa uusan Ilaah jirin waa weligii jire, intii ka horeysay intuusan

abuurin uunka iyo waxa ku jira Ilaah wuu jiray. Waxaan oo idil baa u baahan

in sida dhabta ah loo abaaro ka micnayn tooda. Ma aysan jirin wakhti la oran karo

wakhtigaa Ilaah ma jiri jirin, sababta oo ah wakhitga iyo uunka

iyo wax walba oo ku dhex jira Isagaa Abuuray iyada oo aysan jirin adduunyo iyo uunba.

**Ilaah Lalama Mid Dhigi Karo Wax Kale Ama Lagu Mithaali Karo Wax Kale.**

Kitaabka qudduuska waxa uu inagaga digay in aan siday doonto maskaxdeena

ay ugu cabirto waxyaalaha ku saabsan Ilaah. Ilaah baa ku caddeeyay wax sii sheegidii nabiyada

**Dadka maxay yihiin?**

Su’aasha haddii ay ahayd yuu yahay Ilaah? Qarniyo badan ay dadkuna ay hadal hayeen, sidaas

oo kale su’aal kale ayaa jirta oo ah ‘dakuse maxay yihiin?’ tani waa runta gaar ahaanayd ee xiligeena iminka ay taagan. Garashadeena, aqoonteenna iyo horumarka xagga cilmiga aalladaha casriga ah oo dhan markii la isu geeyey, wali ma hayno wax inaga qanciya su’aashaas. Laga yaabaa in aan waxyaalo badan aan fahannay oo ay waagii hore awoowayaasheena ka qaroonnaa ama aysan fahamsanayn xilligoodii, laakiinse wali dhabtii ma fahamsanin inaga qudheenna waxa aynu nahay.

**Ragga iyo Dumarka Ma Xayawaan Unbaa Keliya?**

Haddii uusan Ilaah jirin dee, dadku waa iska xayawaan sidiisa oo kale, neef jidhleh oo nool weeye sidiisa oo kale waxbana kuma kala duwana bani-aadanka iyo xoolaha. Middani ayaa ah haddaba fikradda maanta adduunka dadka ku nool ugu caansan ama hadal haynteeda ay ugu badan tahay fikradda ah inuusan Ilaah jirinba.

Waxay ku leeyihiin dadku waa wax ka dhashay soo saaridda meertada beeyadda noole ee dabiiciga ah ku jira isbedelada socdaalka esbedbedala uunka ee ka dhasha waxa loo yaqaanno afka qalaad 'Evolution-ka'.

Bal haddaba haddii uu xaalku saa yahay, so lama oran karo waxa kaliya ee ugu weyn ee aan u baahanahay waa waxyaalaha ku saabsan xagga kobcinta xubanaha jidhka iyo waxyaalaha maadiga la arka ah dunida korkeeda laga heli karo sida nolol barwaaqo iyo badhaadha leh, waxyaalo ina farxad gliya. Haddii uusan Ilaah jirinse, waa inaan wax iska cunnaa oo aan cabnaa waxaan doonno, guursanaa, inagoo og inaan berri dhiman doonno, haddii uusan Ilaah jirin nolosha minco sidaa u sii buuran ma laha, oo xumaant iyo wanaagna waxay la mid yihiin hadba waxa aan jecel nahay iyo waxaannu jecleyn hadba sidaan doonno oo nafteenna jamato.

**Waxaa Laynaga Abuuray Ruux**

Laakiinse Kitaabka Qudduusska (Qorniin kasta wuxuu ku ahaaday Ruuxa Ilaah oo waxtar buu u leeyahay waxbaridda ----) wuxuuna inoo sheegayaa wax ka duwan waxa dadku ku fikirayaan maanta oo macquul ah qeexiddeeds. Dadka Ilaah baa abuuray, wuxuuna ka abuuray u ekaantiisa, taa micno ma aha xagga muuqaalka jidh ahaanayd, "Oo Ilaah nin buu ka abuuray araggiisa, aragiisa ayuu ka abuuray isaga; lab iyo dheddig ayuu abuuray" taa oo fasiraadeeda waxaa weeye

ninku waa u ekaanta Ilaah oo leh xagga damiirka, dabeecadda loo abuuray sabateeda sida inuu caabuddo Ilaah, garasho lahaado oo aysan lahayn abuuritaanka kale ee uu Ilaah abuuray sida xoolaha badda hawada iyo dhulka lagu beeray oo inaba lahayn garasho iyo waxgarasho toona. Waliba ninyahow adigu waxaad leedahay dareen aad ku kala garn karto waxa xun niyo waxa wanaagsan, inkasta oo aad mararka qaar iska dafirto si ogaan ah.

**Qodobka Waxyaalaha Ugu Muhiimsan**

Waxaad u baahan tahay inaad ogaato inaysan jirin wax idin dhex istaagi kara dhexdiina adiga iyo Ilaah. Haddii ay noqoto  dhibaatooyinbka dabiiciga ah ee adduunka ku xeeran, taasina ma aha mid ku waarta waxyaala guud ee ugu muhiimsan noloshaada. Waxyaalaha ugu muhiimsan noloshaada waxay tahay inaad Ilaah hortiisa ku qumanaantid.

Haddii sidaa ay tahay inuu Ilaah jiro, haddee geeridu ma ah hiigsiga ugu dambeeya, waxaadna helli doontaa qorshihii laga lahaa noloshaada markaad Ilaah u kuur gashid waxa uu yahay. Adeecidda Ilaah markaad qirato Ilaah baa kuu ahaan doonto waxyaalaha ugu horreeya ee aadka muhiimka kuugu ah.

Lama mid tihid abuuritaanka xoolaha  kale ee adduunka jooga, dadka kaliya ayaa garan kara Ilaah waxa uu yahay.

Laakiinse haddii dadku  fursadaa leeyihiin,

Waa maxay sababta ay u sameeyaan shararka (xumaantabadan)?

Waa maxay sababaha ay u dhacaan  islaynta iyo dilka farha badan ay isku hayaan?

Waa maxay sababaha keenay nacaybka iyo carrada dheeraadka ah?

Waa maxay sababaha keenay colaadaha iyo xadgudubyada ay isku hayaan?

Waa maxay sababaha keenna inay dadku baabi'iyaan oo buruburiyaan beeyada deegaanka ay ku nool yihiin haddii ay noqoto hawada, dhirta iyo dhamaan deeqda Ilaah uu ku manaystay inay ka noolaadaan?

Waa maxay sababaha dhaliya abaaraha macluusha dadka badani ay ugu dhintaan baahi darted?

Sabab Sabab Waa Maxay Sababta?

Jawaabta asalka u ah ka jawaabidda su'aalahaa aan isku soo weyddiinay sadarada kore waa waxa aan ugu yeedhno ama aan u naqaanno "Danbi" ayaa ku dhex milmay arragii uu Ilaah ka abuuray ninka oo naga burburiyey (Masaxay) ama naga tirtiray garashadii uu na siiyey abuurayahayaga waa Ilaahye' haddaba waa maxay Dambiga?

**WAA MAXAY DAMBIGU?**

Dembigu waa qofka Ilahay abuurta oo ka leexday adeecidda wixii Ilaahay ku amray ama uu ka doonayyey ama waa qofka oo caabuda u rumaysta inuu Ilaahiisa yahay sida waxyaalaha maadiga ah ama waxyaalaha uunka Ilaahay ku abuuray sida, Qoraxda, Bisha, Xiddigaha, Xoolaha, Buuraha, dhagax sanam ah meel la dhigtay, lacagta (iwm). Haddaba intuu Ilaah qofka caabudi lahaa haddii uu ka doorbido waxyaalaha aan kor idinkugu soo sheegnay inuu caabudo dee waa dembiile dembi buuna ka galay Ilaah.

Dembigu waa dabeecadda aadanaha asal ahaan ka bilowgii noloshii Aadan iyo Xaawo ku markii ay ku hor dembaabeen Ilaah hortiisa damaca doonistooda awgeed addeecid la'aantii ay ku jabiyeen balllantii ee ahayd Miraha geedkaa ha cunina. Deedna waxaa ka dib dhacday inay cuneen halkaasina ay wehelnimaddii Ruuxa Ilaah ay la wadaagayeen ku luntay. Laakiinse haddii aan dembigeena qiranno Ilaah waa aamin iyo caadil inuu dembiyadeenna inaga cafiyo , oo uu

inaga nadiifiyo xaqdarada oo  dhan. Haddiise aynu nidhaahno ma ynu dembaabno Ilaah waxaynu ka dhigeennaa beenaale oo Ereygiisa inaguma jiro.

Waxaan dadka maanta jira ku aragnaa inay sameeyaan waxayaallo aan macquul ahayn inay moodayaan inay dembiga isaga meeri karaan ama kaga baxsan karaan dunuubtooda inkasta oo haddana dareen iyo maskax ahaan aaminsan inay dembiilayaal yihiin sida:- Caabudidda Dhismo ama Shay ka mid ah waxyaalaha dabiiciga ah ee aan noolayn ama waxyaalo ay gacmahooda ku samaysteen sidaasna u aaminsan wxyaalahaaa ay Ilaaha ay ka dhigteen inuu dembiyadooda cafinayo kaga mayrayo dunuubtooda. Taasina waxay sababtreeda waxay tahay Aadanaha sidiisaba qalbigiiisu waa wada shar miiran.

Dembigu waa qofka Aadanaha ah oo uu Ilaah u ekaantiisa ka abuuray inuu u hoggaansamay damaca jidhkiisa intuu u haggaansami lahaa doonista Ruuxa Ilaah.

**Dembigu waa sida Cudurada Faafa oo kale:**

Damacyada jidhka iyo falalkoodu way muuqdaan, waana kuwa ay ka dagi la’adahay dunidan maanta aynu ku noolnahay , waxaana ka mid kuwaasi sida:- Sinada, wasakhnimada dhilanimada, sanam caabudidda, sixirnimada,cadownimada, dirirta, masayrka, xanaaqa/cadhada, is-ilaaqa, iskala qaybinta, bidcinimada, xaasadnimada, , sarkhaanimada, rabshooyinka, dhagarta, isqarxinta, argagisnimada iyo wixii la mid ah oo wax burburiya. Dembigu waa xadgudubka iyo caasinimada sida qofka Aadanaha oo caabuda waxyaalo muuqda oo aan Ilaah ahayn. kan Ilaah u soo bixiyeyinuu dhiiggiisa kafaarogud ku noqdo xagga rumaysadka la rumaystay dhiiggiisa aawadiis, inuu xaqnimadiisa ku muujiyo dembidhaafka uu dembiyadii hore loo sameeyey ku dhaafay samirkii Ilaah;  waxaa weeye muujinta xaqnimadiisa ee haatan joogta inuu isaga qudhiisu xaq ahaado iyo kan xaq ka dhiga kan Ciise rumaysan.

Haddaba faankii meeh? Waa reeb-ban yahay. Sharci caynkee ah buu ku hadhay?

Ma xagga shuqulladaa? Maya; laakiinse wuxuu ku hadhay sharciga rumay-sadka.

Sidaas daraaddeed waxaannu ku tirinnaa in nin xaq ku noqdo rumaysadka ee uusan xaq ku noqon shuqullada sharciga. Ama Ilaah ma Ilaaha Yuhuudda oo keliya baa? Miyuusan ahayn kan quruumaha kalena? Haah, waa yahay kan quruumaha kalena, hadday tahay in Ilaah mid keliya yahay oo uu kuwa gudan xaq kaga dhigi doono rumaysadka, kuwa buuryo- qabka ahna rumaysadka.

De miyaannu haddaba sharciga ku burinnaa rumaysadka? Yaanay noqon! Laakiin sharciga waannu taagnaa.

**Asalka Dhibaatada** waa dadka oo aan si adag u qaadan arrimaha Ilaah ku saabsan. Sidaas daraadeed uma qaataan dembiga inuu yahay wax halis ah. Xaggooda dembiga wxay u arkaan wax iska sahala ah oo ay bulshadu isku dhaliisho, ama ku xiran dareenka qofkaa hadba siduu wax u arko ama ku xira habka diimaha ugu shaqeeyaan kor u qaadidda hab nololeedkooda.

Waa ta dhalisay in Qoraalka Qudduuska iskugu dayaan inay yiraahdaan badbaadadu waxay ku timaaddaa camalada ama badbaadadu waxay ku xiran tahay shaqooyinkaada.

**Ma shaqayso doonist jidka qofka!**

Waxay u muuqataa wax suuragal ah oo dhici kara haddii ay dhibato dembiga sababay i qabsato shakhsi ahaan waan awoodaa aniga qudhayso xaliyo ama iska soo jiido si aan uga baxo dhibaatadaa oo aan ka soo noqdo waddo cusub oo bedesha in aan ku socday kolkii hore. Waa wax wanagsan xagga dhegaha dadka weedhahaa dusha aan ku soo aragnay, laakiinse taasi ma aha waxa shaqayn kara.

Dhibaatooyinkeenna waxay ku xiran yihiin oo ay asal ahaan hoos galaan sooyaal taariikheedkaii dhicitaankii aan bani-aadanka ka dhaceen amaantii Ilaahay kolkii ugu horreysay ee ay ku hor dembaabeen Ilaahii ina abuuray hortiisa. Wax kale oo inaga bedeli karaan ma jiraan haddii ay noqon lahayd awoodeenna shakhsiyeed ama diin inagabedeli kartaa wixii aan ku dhalanay ee inagu beernaa ka dib markii aan ku hor gefnay Ilaahii ina abuurtay bilowgii dunidaba.

**Jidka dadku - waa waddo khaldan**

Ilaah wax uu si cad inoogu sheegay Kitaabka Qoraalkiisa Qudduuska erayadan:

"maxaa yeelay, jidhka kafikiriddiisu waa la col Ilaah, waayo, ma hoos gasho sharciga Ilaah, mana hoos geli karto. Kuwa jidhka ku dhex jiraana kama farxin karaan Ilaah."

Qofka xaq kuma noqon karo ilaalinta sharciga haddii aan dhanka kale ka eegno ilaalinta sharciga cidna xaq kuma noqon karto bal eega aayadahan ku jira Roman 3:25-31 waxayna ku leeyihiin oo ka turjumayaan sharcigii Nebi Muuse Ilaah u soo dhiibay inuu ku hoggaamiyo dadkii waagiisii noolaa. Kaas oo ahaa midki keliya ee la xirriiray dhaqamadoodii iyo hab nololeedkoodkii kulan diiniga ciidaha. Taasi kuma badbaadi karto – sababta oo ah maba dhowri kartid ka bani-aadinimda ahaan fulinta shuruucyadaa, taas oo la mid ah sida kuwa kale ee felesofiyada diinta ama shuruucda nolosha.

**Mid xaq ah ma jiro**

Qoraalka Kitaabka Qudduuska wuxuu ina barayaa inuusan jirin mid xaq ahu, mid wanaagsan. Waxaan ku tirinaa taasi inay tahay buunbuunin weyn ama ugu yaraan ah muranka un ah, sababtoo ah dadku waan ognahay inay isu arkaan wax wanaagsan ka bani-aadan ahaanmarkaan u hadalno. Taasi oo u eg wax fiican oo asxaan ah ka faaloodkeeda. Laakiinse Qoraalka qudduuska ah eek u qoran Kitaabka Qudduusaka Ilaah wuxuu inoo sheegayaa heerka aan taagan nahay dabeecad ahaan aan ku sugna nahay. Ciise wuxuu fulyey dhamaan wuxuu Ilaahay faray ee xaqnimadiisa

ahayd taas oo aan u naqaanno tobanka amar eek u qoran (kitaabka Exodos 20) oo laga heli karo Matayos 22:37-39 kol kuu Ciise leeyahay waa inaad ka jeclaataa Ilaah qalbigaaga oo dhan naftaada iyo maskxdaada.

Bal isweyddii adiga qudhaada inaad marwalba kari kartid fulinta amaradan.

**Ma jiro mid ilaalin kara sharciga Ilaah**

Sida xaqiiqda ah jawaabtu waxay tahay ma jirto qof ilaalin kara shaciga Ilaah. Inaguma jiro mid nadiif ka ah dembiga oo raalligalinkara Ilaah. Waaana wax ku xiran qalbgaaga sida runta ah, sababta oo ah Ilaah wxa uu ina siiyey mid walba oo inaga inaga mid ah niyadda garashada. Niyadda figradda iyo Kitaabka Qudduuska waxay inoo sheegaan inaynu inaga wada dembiilyaal nahay. Waxna ku jabna dadaalkeenna adage e aan isku dayeeno inaan falno wanaagga, mana gari kartid heerka uu ilaahay ugu talagalay arrimahan khuseeya qorshihiisa abuuritaaneeyd.

**Maxaa sababay inaad ilaalin weydo sharuucda Ilaah**

**Baahidaada ugu weynn**

Waa midda la jirta indho la'aanta xagga ruuxa weeye xaqiiqdii xitaa haddii aad akhriso qoraalka waxba kuuguguma soo kordhin karo, sida ereyada Ilaah, dembiga, badbaadada nolosha waligeed ah iyo qodobaba kale oo la mid ah ee ku jira Kitaabka Qudduuska. Habase ahaatee, bahid ugu weyn waxay tahay argga indhahaaga oo u furma xagga ruuxyada. Taas oo uu Ilaah oo uu Ilaah keliya awoodo inuu kuu furo si aad u aragto maskaxdaada dedna aad qalbiga uga rumaysato.

**Waxaa jira Jid ku tusi kara tubta quman**

Dad badan ayaa waxay dhibaato weyn ka qabaan fikradda ah inuu  Ciise Masiixa uu yahay waddada keliya uu ban-aadanka fray inay ugu iman karaan xaqnimadiisa., taas oo ay dhab ahaan kaa cabanayaan middaa keliya inaysanahayn loona dulqaadan Karin.

Sida xaqiiqda ah waxay dadkaa ku leeyihiinwaxaa jira oo lama huraan ahwaddooyin badan oo dadku ugu tagi karaan Ilaah.

**Daacadnimda ma ku filan tahay**

Sawirka ay ka bixinayaan dooddan ayaa axay tahay sida umad ku dhaqan dhul buuralay ah. Buurtaas oo haddii la doonayo meel in la isugu yimaado gaar ahaan mel ka mid xagga sare ee buurta, haddee reer walba wuxuu soo marayaa waddada ku hagaysa dhakada ama xaga sare ee buurta ee lagu ballansanaa in shirku uu ka qabsoomo. Waddada Masiixiyiinta, ta Mulsinka, Hindduuda, Buda'isimka, Yuhuudda xitaa laga yaabe inay jirto waddo ay ku iman karaan dadka dadka aan jiritaanka Ilaah aaminsanayn (Athiest).

Dhamaan waddooyinkaa waxay kuugu hoggaamin karaan Ilaah haddii DAACAD tahay.

Oday caaqil ah baa hadda ka hor wuxuu yidh " Waxaa jirta waddo dadka ay u arkaan inay quman tahay, laakinnse ku hagta waddada dhimashada" sida ay doontaba ha ahaatee "Waddada" Kitaabka Quduuska aayadahiisa ku cad waxay la micne yihiin oo ay ka turjumayaan jidka qofka bani-aadanka  ah u kaxayn karta nolosha nafsadiisana ku xiran tahay – iimaankiisa (rumaysadkiisa, dabeecaddiisa waxay maskaxdiisa ka fikirto iyo waxa uu ka walwalsan yahay).

**Xagee bay taktaa waddadaasi?**

Waxa ugu muhiimsan waxyaalaha ku saabsanjidkaa waxaa weeyeinaad ogaato meeshaad ku socoto. Qofka haddii uu isagu doorto jidka  nolosha ee naftiisa isaga oo aan garanaynin meeshay ku hoggaamin karto waxay la mid tahay waxa uu Kitaabka Quduuska ugu yeero "NACASNIMO" ama doqonimo.

Laakiinse ereyga wuxuu u muuqdaa mid wanagsanmarkaan kelmadda DAACADNIMO fasirno micnaheeda, Soomalidu waxay tiraahdaa "Daacad ma hungoobo" laakinse waa noocee daacadnimadaa.

Qofka caadiga ah lagama yaabo inuu iska xusho ama isku furto qaadidda waddo khaldan,lagamana yaabo inaad u aragto waddadaa inay wax ku yeelayn karto ama naftaada halis galin karta. Sababta oo ah adigu waxay kula tahay tubtii wanaagsanayd ee aad dooratay inay saxan tahay. Sida dhabta ha ma eedeyn kartid haddii ay markii hore adigu sax kula ahayd in jidka Ilaah loogu tagi karo.

**Iska idha tirodda/dafiraadda waxa uu Ilaahay kuu sheegay**

Ilaah wuxuu ku leeyahay waxaad doonto waad samayn karaysaa oo waad isku eedeyn doontaa ugu damabayntaada, dhibic ka mid ah daacadnimadaadii ama waxaad haddii aad doorato inaad iska diiddo ama aad iska dhaga tirto oo aad isk indh tirto DIGNINAHA Ilaah iyo Warkiisa Wanaagsan ee Injiilka ku jira ee kuugu yeerayo inaad ka toobadkeento dembiyadaada oo aad rumaysato/aaminto Ciise Masiixa, waxaad ku eedeyssan tahay gaar ahaan sababta ah Ciise Masiixa wuxuu kuu sheegay oo uu kaaga digayo jirto waddo keliya oo aad u kal jaho duwan melaha ay ku kala dhamaadaan sida bari iyo galbeed ama waqooyi iyo koonfur u kala socda oo aad u kala duwan Ilaahay Amarkii!

Waxaan jecelnahay inaan ka fakirno fursadaha badan ee nolosheenna u furan dareenka keliya, taasina waa dhab akhristow. Waxaan awoodnaa inaan dooranno waxaan qaadi karno ama qaban karno sida qofkaan guursan doonno oo nolosha kula wadaagi karta. Waxaan dookh u leenahay inaan dooranno waxyaalaha aan lacagtayda ku samayn karno waayo inagaa iska lehe. Doorashoodyinkaa waa waxyaalo ku xiran nolosha hab nololeedka dunidan dusheeda ah.

**Laakiinse Ciise Masiixa wuxuu ku leeyahay waxaa jira labo Jid oo keliya:-**

Inaad jidka dhuuban albaabka iyo inaad raacdid jidka oo kuugu hagayo burburka, inta badan taas bay dadaka u haystaan inay hagaagsan tahay. Laakiinse waddada dhuuban ee cariiriga ah ee albaabka yar leh waxay kuugu hoggaaminaysaa nolol.

**Jawaabta Ilaah ee waddada saxda ah**

Bal ka fikir tusaalahan oo kale waxaa jira hoteelo ka mid ah hoteelada cuntada ee caalamiga ah oo aan loo ogalayn inay ka cunteeyaan dadka aan ku labisnayan suufka (suudka) oo waliba haddii aysan xidhnayntiega/garavatiga albabka aysan ka soo gali gkarin oo la celinayo. Taas oo la micne ah xeerka hab maamuleedka hoteelka. Haddaba ganacsadayaasha ma doonayaan inay ganacsigooda lumiyaan hadddii lacalla macaamishooda mid ka mid ah loo diido inuu hodheelka soo galo taydh la'aan darted, waxaase laga yaabaa milkiilha hodheelka inuu yidhaahdo "Saaxiib soo dhaaf oo soo gal hodheelkayga anaa ku siinaya aydh aad ku gasho hodheelka" deedna qofkaa

marba haddii uu xidho taydhkii wuxuu ka soo baxay shuruudihii buu ka soo baxay waxbunna ku cuni karaa hodheelka cid ka horjoogsan kartaana ma jiraan.

Taas oo la micne ah masaalkii uu Ciise Masiixa kula hadlay tusaalihii ku saabsanaanin aan xidhnayn dharkii looga baahnaa  dayaafadda arooska, waayo kuwii loogu yeeray arooska ma aynan istaahilin, waayoku jiray dadkii loo yeeray. Sidaas daraadeed qofkii arooska dhiganayyay ayaa shaqaalihii qabanqaabada xafladda arooska ku amray ninkaa dharka arooska loogu talagayy xidhnayan goobta xafladda laga saaro oo dibadda loo tuuro, waayo kama mid noqon kara dadki laga casuumay xafladda arooska oo lagu aqoonsan lahaa dharka u gaar ah oo kuwa kalaba xidhan yihiin kana duwan dadka intiisa kale labiskooda.

**Xaqnimada Quman**

Xaqnimada quma waa ta heerkeeda sare leh ee uu Ilaah ugu tala galay in lagu galo xaadarnimadiisa, loomana ogola kuwa dambiyeysan inay gartaan Isaga ama galaan xaadarnimadiisa iyo amaantiisa.

Middaasna weeye dhamaanteen xeendaabka derbiga inagu wareegsan ee aan ka dad ahaan ku dhex jirno.

Laakiinse WArka Wanaagsan ee Injiilka ayaa lagula kulmi karaa codsigiisa oo uu Ilaaha Aabbaha ah inagu deeqay oo uu huwiyey qumanaanta, taas oo lagu magacaabo “Xaqnimada Masiixa”.

**Badbaadadu waxay ku timaaddaa Nimcada oo ku xiran Rumaysadka**

Ereyga Ilaah waxa uu ina leeyahay badbaadada waxaan ku helnaa nimcada oo si toos ah ugu xiran rumaysadka Sayid Ciise Masiixa ku jirta.

Ereyga “Badbaado” siyaalo kala duwan baa loo qeexi karaa oo ay dadku u kala fasiran karaan.

Dadka qaar baa u micnaysta inay la mid tahay samata bixinta qof laga samata bixiyobalwad dilootay sida khamricabidda, qaadcunidda, ama dadka ku bahdilmay isticmaalka waxyaalaha mukhaadiraadka ee maanka dooriya sida daroogada noocyadeeda kala duwan haddii ay noqon lahayd midda sida sigaarka oo kale “Xashiishada” ama ta cirbadda ah ee la isku turqo iyo cunista qaadka” dadka qaarna waxay u micnaystaan kobcinta dhaqan dhaqaale ee bulsho laga soo badbaadiyey afduub ay ku jireen ama macluul haysatay. Laakiinse Kitaabka Qudduuska waxa uu ka hadlayaa ruuxa qofka oo lagu huwiyo wanaagga Xaqnimada Masiixa inuu badbaadayo.

**Waa Maxay Dembigu?**

Muhiimadda dembiga qeexiddiisa kooban waa hoos u dhaca fullin la’aaneyd ee wuxuu Ilaah inaga doonayay inaga. Kitaabka Qudduuska wuxuu inoo sheegaa dhamaanteen inaan wada nahay dembiilayaal.

“Maxaa yeelay waxaa qoran dhamaan way wada dambaabeen oo gaadhi waayeen amaanta Ilaah”sababta oo ah dembigu wuxuu ku dhex jiraa qalbiyadeenna, oo si toos ah baan uga soo horjeedsanay wuxuu Ilaah ina faray inaan ku dhaqanno ama aan samayno bilowgiiba, taas oo dhalisay doonisteenna oo noqotay inaan samayno waxaan doonno intii aan tii Ilaah samayn lahayn.

**Ma dhib halis ah baa Dembigu?**

Waxaa maanta jira dad u fikira doqonimada tii ugu weyneyd oo aaminsan dembigu inuu yahay wax aan micno lahaynba. Waa inaan ku noolaanaa sida aan doonayno inaan ku noolaano bay ku

leeyihiin oo ka dhaadhacsan. Sidaa daraadeed, dembiga ayay xayeeysiis u sameeyaan, la cayaaraan, bandhigaan, una arkaan guud ahaan wax dhib ah lahayn oo waxyeelo gaarsiin Karin.

**Dembigu wuxuu la mid yahay sida cudurka Kansarka oo kale**

Calaamadaha ama sumadaha lagu gartaana qofka qaba cudurkan dembiga waxaa ka mid ah falalka xunxun sida:- dilka, dhaca, boobka budhcadnimo, khaa'inimada, beenta, argagaxisinimada iyo wixii shar ah oo idil. Dembiga waxaa laga arkay markiisii hore sidii uu uga xumaaday Ilaahay wuxuuna kuwii la yimid iyaga qudhooda dul dhigay xukun ay la socoto axdiga badbaadintooda.

Wuxuuna ku maaxay dareenka danaystinimo, hunguri weynaanta lagu arko dadka caadiga ah dabeecadooda, wuxuuna burburiyey noloshii qoyskii janada kula noolaa Ilaah.

Dembiyadeenna waxaan anaga oo idil u wada gudbinaa, qaybinaa, kaga qaybqaadanaa dhamaan dunida waxa ku jira oo idil oo waliba dhamaanteen waxaan la dhibaataysanahay sababtaa darted. Laakiinse waxaa jira waxyaabo ka sii daran akhbaarahooda tabinteeda.

**Waa kuma Ciise:-**

Cisaha reer Naasareet wuxuu laba kun oo sanadood ka hor ku noolaan jiray waddanka Israa'iil/Falasytiin. Tirsi sanadeedka taariikhda miilaaydiyada waxaa dhexddeda ku cad oo ay sheegyesaa oo sanad walba loogu dabaal degaa xuska dhalashadiisa.

Hab nololeedka taariikheed iyo waxbariddiisaba waxay ku qoran yihiin sida ku cad afarta kitaab ee injiilka ku qoran qaybta labaad ee Kitaabka Qudduuska ee loo yaqaanno Axdiga Cusub. Waliba waxaa jira wax sii sheegiddii Nabiyadii hore oo farabadan waxyaalo ku saabsan Ciise Masiixa oo ku qoran Qaybta hore ee Kitaabka Qudduuska ee Axdigii Hore, kuwaas oo la qoray boqlaal sanadood ka hor intii uusan dhalanba Sayidka. Taas oo dhamaystirtay caddeynteeda **iyo** faahfaahinteeda hab nololeedkiisii iyo dhimashadiisii.

Wax sii sheegiddii Nabiyadii Hore, tusaalle ahaan waxay inoo sheegiyaan Masiixa waa Ciise inuu ku dhaln doonnay gabadh bikrad ah oo uu ku dhaln doonay "Beytalaxam" wuxuuna gaadiid ka soo dhigan doonay bay yiraahdeen mabiyadii neef dameer ah oo uu ku soo galidoonaa magaalada "Yerusaalim" waxaana lagu gacan gelin doonaa 30 shekel oo lacag ah. Ciise Masiixa qudhiisa ayaa sheegay in la dilli doonno laakiinse uu ka soo sara kici doonno ka dib maalint saddexaad geerida.

**Sheegashada wax ku oolka ah**

Kitabka Qudduuska waxaa ku qoran shaagashooyin farabadan oo wax ku ool ah oo ku saabsan Ciise Masiixa, waxaana ka mid ah oo ina leeyahay Ereyga Ilaah:- Isagu waa wiilka Ilaah (Yooxanaa 3:18). Isagu waliba waa Ilaah (Yooxanaa 1:1). Isagu wax dambi ah malahayn (Cibraaniyadda 4:15). Isagu wuxuu soo bandhigay mucjisooyin yaab leh (Matayos 14: 13-36). Isagu wuxuu soo nooleeyey qof bani-aadan ah oo dhintay (Yooxana 11). Isaga qudhiisu wuxuu ka soo sarakacay geeridii, intuu dhintay oo la aasay ayuu saddex cisho ka dib ka soo sarakacay kuwii dhintay, sidaana waxaa caddeeyey Malaa'igihii Ilaah oo u muuqday qaar ka mid ah xertii oo xabaasha tagay waxayna ku yiraahdeen"Halkan ma joogo, waayo, wuu sarakacay siduu yidhi oo kaalaya oo arka godkuu RAbbigu jiifay, waxaad dadkiisa u sheegtaan kuwii dhintay ayuu ka soo sarakacay, oo wuxuu idiin hormarti doonnaa ilaa iyo Galili."

Sida dhabta ah waa xaqiiq dhacdo la hubo waxyaalaha ku qoran qoraalka Kitaaabka Qudduusaka ah ee ku saabsan Rabbi Ciise Masiixa ka uu ahaa, waxyaalaha uu sameeyey iyo waxa uu doonayay inuu sameeyo. Dadkii Isaga la noolaa iyo waxyaalihii ay ku arkeen noloshiisa markaad eegtid waa wax aan la dhayalsan Karin sheegashadiisa, haddii kala maba aysan inoo soo qoreen waxbariddiisii iyo mucjisooyinkiisii la yaabka lahaa runtii, kuwaasoo qeexayay Ilaahnimadiisa. Dadkii ka ag dhawdhawaa ee xertiisa ahaa aadna ula socon jiray waxbarriddiisii waagii danbe waxay naftooda u hureyn oo ay u dhinteen inay sheegaan wixii uu baray oo ay ku arkeen noloshiisa Isaga.

**Waddada Keliya:-**

Waxaynu ku bilownay qormadan buuggan yar boggeedii koowaad su'aal haddii ay diimahan kala duwan si fudud inoo leeyihiin waxaa jira waddooyin kala duwan oo loogu tagi karo isal Ilaah. Jawaabta Kitaabka Qudduuska  waxay ina leedahay waa "MAYA" Ma jirto wadda kale oo loogu tagi karo Ilaah Ciise Masiixa mooyaane. Isagaana sidaa yidhi oo afkiisa laga hayaa, jidka keliya ee loo maro Ilaah inuu Isaga yahayna caddeeyey wuxuuna yidhi "Anigu waxaan ahay Jidka iyo Runta iyo Nolosha, qofka Aabbahauma yimaado, xaggayguu ku yimaado ma'ahee"

**U Noqoshada Ilaah:-**

Warka wanaagsan eek u jira Injiilka, waxa uu yahay, markii Ciisae Masiixa ku dul dhintay qorigii Iskutallabat, wuxuu qatay dembiyadii dadka  oo wuxuu ka badbaadieyey daku cadhadii Ilaah ee dulsaarnayd dembiyadoodii awgii oo xukunkii ay ku hoos jireen ayuu ka wakiishay.

Isagu waxa uu ahaa ka keliya ee aan dembaabin ama dembi laawe ah ee jira awoodan inuu isku bedelo oo uu u istaago meeshii ay ku haboonayd in lagu ciqaabo dadkiisa.wuxuuna u dhintay xaqnimada kuwii aan xaqnimada lahayn, si uu ugu keeno Ilaah. Geeridiisii ma ahayn oo keliya inuu cadhada ka soo celiyo dadka, laakiinse waliba wuxuu kula heshiisiiyey Ilaah dhamaan kuwii uu Isaga Aaabbaha siiyey.

**Jidku Waa Ciise Masiixa:-**

Qof caadi ah ma uusan ahayn Ciise micno wuxuu ahaa Ilaah oo noqday dad. Wuxu aaday meeshuu ka yimid oo ahady janada si uu u eego oo uu u badbaadiyo dadkiisii lumay.

Markii ugu horreysay ee uu Ciise yimid adduunkan gaar ahaan meeehuu ku dhashay oo ahayd magaalda Baytal-laxam, Malaa'igihii Ilahay baa ku soo dhaweeyeyfaraxad raynrayn ku jirto oo ay weheliso gabao ay weheliso gabao iyo heeso Ilaah amaan ah. Laakiinse saddex iyo soddon sanadood ka dib markii uu Ciise Masiixa ku dul dhiminayay iskutallaabta dusheeda Malaa;igihii ma aysan u heesin, waxayna ahaayeeen kuwa la yaaban markii ay arkeen in qiimaha ay ugu fadhido xagga badbaadada dadkiisa inay dhacdo dhacdadaan. Waxaa laga yaabaa inay ku yiraahdeen sidan yuusan u samayn danta dadka kale! Xaqna ma aha Ciisahan dembi la'aanta ah inuu u dhinto dembiyada caasiyiinta bani-aadanka a rag iyo dumarba. Laakiinse, taasi waxay ahayd qorshihiii Jidka Ilaah ugu talagalay badbaadinta dadyowgiisa.

**Ilaah Waa Jacayl:-**

Ilaah aad buu inoo jecel yahay maadaama oo uu inoo soo diray Ciise MAsiixa bedelkeenna inuu u u qaato ciqaabteennii una dhinto halkii ay ahayd inay ciqaabta inagu innagu dhacdo. Dhamaan kuwa ISaga helay nimcadiisa ee rumaysatay magaciisa wuxuu siiyey xaqnimadii ay ku noqon lahaayeen caruurta Ilaah.

**Ciise Wuxuu U Dhintay Dembiilayaasha:-**

Ciise waxa uu si dhib badan ugu dul dhintay qorigii iskutallaabta Roomaaniyiintii. Laakiinse dhibaatadan xanuunka badan ma aysan ahayn mid ku kooban xanuunka jidhka keliya. Laakiinse waxay ahayd xukunkii Ilaah oo Isaga qudhiisa qaatay oo ku timid cafiska iyo jacaylka jaliilka aabbaha Ilaah ah, taas oo ahayd fullintii Axdigii Hore ee uu Ilaah inala dhigtat haddii aan nahay dadkiisii uu abuurtay bilowgiiba. Iskutallaabta waxay ahayd dhacdada ugu sarreysay ee Ilaahayaga ku muujiyey jacaylka nimcada. Iskutallaabta dusheeda waxaynu ku aragnay Ilaah Qudduusnimadiisa oo idil oo uu ku furdaamieyey debigii Aadanaha (dadka), Ilaah wuxu ku kala soocay oo uu ku tirtiray dadkiisa Isaga waa wiilkiisiye Rabbi Ciise Masiixa, mas'uuliyadoodiina qaatay dembiilayaasha, cadhadiisiina waxay ku dul dhacday Isaga.

**Ciise Wuxuuu Raalli Ka Noqday Fullinta Dhamaan Doonistii Ilaah:-**

Dembigii waa la ciqaabay taas oo ahayd siduu ku micneeyey Ilaah inay ahaato. Iminkana ma jirto ciqaab dheeraad ah oo ina dul saran ka bani-aadan ahaan, maadaama qaantii na dul saarnayd uu bixiyey Ciise Masiixa. Ciise waa jidka keliya ee Ilaah loogu tagi karo., maxaa wacay Isaga keliya ayaa ah waddada uu inoo furay Ilaah inaan ugu tagno. Kitaabka Quduuska ah wuxuu ka leeyahay Ciise Masiixa "Badbaadada lgama helo mid kale, waayo ma jirto magac kale oo samada hoosteeda jooga oo la siiyey inay dadku ku badbaadaan, magaca Ciise MAsiixa mooyee" Ciisena wuxuu yidhi "Ii imaada kuwiinna welwelsanow, oo cullaabaysnow, oo waan idin nasin doonaaye" Isagu wuxuu la tacaalay dembiyadeennii, wuxuuna idiin furay waddo uu Ilaah idinkaga raalli noqday oo uu idinka aqbalay Ciise dartii.

**Noqoshada Masiixinimada:-**

Haddii ay doonistaada dhab tahay inaad noqotid mid raaca Ciise Masiixa ama rumaysta Sayidka, waxaa jira dhawr waxyaalood oo aad u baahan tahay inaad fahamto. Noqshada Masiixinimada lama mid ah sida adiga oo ku biiray naadi ma urur; ama ma'aha inaad dano gaar ah awgeed aad u doonaysid inaad Masiixi noqto. Doonistaada inaad noqoto Masiixi ma'aha wax adiga shakhsi ahaan aad saameyn ku leedahay oo ku xiran adiga dareenkaaga ban-aadnimo, laakiinse Ilaah keliya ayaa ah ka awoodda u leh wax ka bedelka qalbigaaga iyo maskaxdaada oo ku garansiin kara doonistiisa waxa ay tahay sida gargaaraha Ruuxa Quduuska hawshiisa ay tahay.

**Adigu Iskama Dhigi Kartid Masiixi:-**

Waxaa laga yaabaa inaad isugu yeerto qudhaada Masiixinimo, laakiinse arrinku sidaa wuu ka duwan yahay ama sidaad moodday ma'aha Masiixiyadda.

**Ilaah Waa In Uu Ku Bedelaa:-**

Kitaabka Qudduuska wuxuu inoo sheegaa Masiixiyiinta inay yihiin "Ilaah wuxuu samaystay" ku waliba oo Masiixi ah waa wax soo saarkii hawsha dheeraadka ahayd ee Ruuxa Qudduuska Ilaah. Taas oo la micne ah in aad adigu shakhsi ahaan wax shuqul ah aadan ku lahayn gabi'ahaanba oo ay waajib kuugu tahay inaad xagga Ilaah keliya wax ka sugto oo aad ku xisaabtanto adigoo waliba baryaya goorwalba inuu isukaa muujiyo xisaabteedan aad ku darsato.

Kitaabka Quduuska waxa uu ku leeyahay waa inaad jawaab cad ka bixisaa waxyaalaha ku saabsan Warkiisa Wanaagsan. Wax sii sheegidii Nabi Ishacyaah ayaa wuxuu qoray:- "Ilaah doondoona inta la heli karo, oo Isaga barya intuu dhaw yahay, ka sharka lehi jidkiisa ha ka tago, nin aan xaq ahaynuna fikiraddiisa, oo Ilaah ha u soo noqdo, oo Isna wuu u naxariisan doonaa, oo ha u yimaado RAbbigeenna, waayo, aad buu u saamixi doonaa" Aayadahn waxay micno ahaan ina leeyihiin Saddex waxyaalood:-

1. **Waa Inaad Doondoontaan Ilaah Inta Wali Wakhti Aad Haysato:-**

Sidee? Ilaah wuu awoodaa inuu qalbigaaga helo ama wuuba “helay”, doonista Ilaah ayaa muhiimadda ugu muhiimsan ah ee aad adigu abid samayso. Akhri Kitaabka Qudduuska , baryo “Salaad” ugu yeero, Isagu kaama fogee!

2. **Waa inaad Towbadkeentaa:-**

Aayadahan waxy inoo bidhaaminayaan faahfaahinta baahida loo qabo Towbadda. Towbadkeenidda micnaheedu waxaa weeyaan inaad kolka hore garato waddooyinkaaga oo idil inay yihiin kuwa shar miiran kuwada ah Ilaah hortiisa ka bani-aadan ahaan. Taas oo la micne ah garashada ama aqoonsiga inaad hor taagan tahay xukunkii Ilaaha Qudduuska ah hortiisa oo aad u baahan tahay inaad Isaga ku soo noqotid sida jidka keliya ee uu kuu furay ay tahay. Taas oo haddana micnaheedu yahay jidk soo noqoshada dembiyadaadii ee uu Ilaahay ogolayn. Taasina waa dhamaystir buuxa oo kaamil ah ebedelka noloshaada iyo jihadeeda. Ilaahay keliya ayaana kuu samayn kara midani. Kitaabka Qudduuska waxa uu ugu yeeraa “Naf dib u dhalatay” ama “Dhalasho labaad”

3. **Waa Inaad Inaad Ilaah ku Ilaah U Soo Noqotaa:-**

Aayadahn waxay kuugu amrayaan inaad Ilaahay ku abuurtay u soo noqotid , taasi oo ii kuugu diyaariyey inuu ku cafin doonno oo uu ku qaabili doonno. Taasina waxaa kuu suuragalin kara oo aad ku samayn kartaa adiga oo rumaysta ama aamina Ciise Masiixa inuu yahay ka keliya ee xaqiijin kara ama ku caddeeyey kuwa aan Ilaah aqoonin dhimashadiisii iyo sarakiciddiisii uu ka sarakacay kuwii dhintay. Waa inaad rumaysataa jiriaanka Ilaah ee ah “inuu kuu soo diray Madigiisii (Wiilkiisa)” inuu dembiyadaada u dhinto si uu kuu badbaadiyo awgood, haddii aad u soo noqoto Ilaahaga toobadkenidda iyo rumaysi buuxa, haddee waxaad raalli ku tahay oo aad isku halaysay wixii uu Rabbi Ciise Masiixa oo laga hayo ereyadan: “ dhamaan

kuwii Aabbaha i siiyey way ii iman doonaan, oo ku alla kii ii yimaado anigu waligay ma eryi doonno”.

Nimcada Rabbiga Ha Kula Jirto!